

## Macluumaadka loogu talagalay Qoysaska – Somali

### Waa maxay akhriska loolanka leh ee Premier?

Akhriska loolanka leh ee Premier waa barnaamijka hawlgalka akhriska iyo qoraalka ee uu soo saarey Premier sannadkii 2004 si uu:

- Ugu dhiirrigeliyo ardeydu inay akhriyaan buug badan oo ay ka helaan wax akhriska
- U hagaajiyo heerarka wax akhriska iyo qorista

Loolanku wuxuu uga baahan yahay ardeydu inay akhriyaan 12 buug inta u dhaxeysa bilowga dugsiga ilaa horaanta Sibteembar.

### Sidee baad ku heli kartaa wax ku saabsan loolankan?

Booqo bogga Shabakadda Waalidiinta iyo Qoysaska ee loolanka akhriska Premier ka wixii macluumaad dheeraad ah.

<http://www.premiersreadingchallenge.sa.edu.au/prc/pages/parents/families/>

kala xiriir Saraakiisha Xiriirka DECD  
Bulshada Taleefanka ah : 8226 2756.  
La xiriir dugsiga xaafada ee ilmahaaga.

### Buugtee baa ardeydu akhrin karaan?

Ardeydu waxay akhrin karaan buugta liiska Loolanka Akhriska Premier iyo sidoo kale buugga ay doortaan. Liiska buugga waxaa lagaheli karaa website ka Loolanka Akhriska. Ardeydu waxay dooran karaan inay ku akhriyaan buugga luuqadaha kale ee aan Ingiriiska ahayn.

- Soo dhaweynta ardeyda Fasalka 7 waxay ugu yaraan ka dooranayaan 8 buug liiska website ka Loolanka Akhriska Premier iyo 4 buug oo ay doortaan iyagu.
- Ardeyda Fasalka 8 iyo Fasalka 9 waxay ka dooranayaan ugu yaraan 4 buug liiska buugta Loolanka Akhriska Premier ka iyo 8 buug oo ay iyagu doortaan
- Ardeyda Fasalka 10, Fasalka 11 iyo Fasalka 12 waxay doortaan 12 ee ay doortaan.

### Xagee baa laga helayaa buugta?

Buugta waxaa laga helayaa dugsiga iyo maktabadaha dadweynaha, dukaamada buugtaiyo online book site..

### Waa maxay abaalmarinada dhameystirka Loolanka Akhriska Premierka?

Shahaado – fasalka koowaad  
Bilada Bronze – fasalka labaad  
Bilada Qalinka ah – fasalka saddexaad  
Bilada Dahabiga ah – fasalka afraad  
Bilada Champion ka – fasalka afraad  
Bilada Legend – fasalka lixaad  
Bilada Hall of Fame medal – fasalka toddobaad  
Akhriyaha Shahaadooyika Joogtada ah (R4L):  
R4L Fasalka Siddeedaad  
R4L Naxaata - Fasalka Sagaalaad  
R4L Qalinka - Fasalka Tobnaad  
R4L Dahabiga - Fasalka kow iyo tobnaad  
R4L Horyaalka - Fasalka laba iyo tobnaad  
R4L Caanimada - Fasalka seddex iyo tobnaad  
R4L Sumcad leh - Fasalka afar iyo tobnaad

### Waa ayo ambaasatoorada Loolanka Akhriska Premier ka?

Sagaalka u sareeya ee South Australian ka ah iyo sixda ambaasatoor ee kooxaha ayaa taageera loolanka akhriska premierka.

kuwani waa Naadiga Midowga Footiga Adelaide, Adelaide Lighting, Naadiga Kubada cagata ee Port Adelaide, Naadiga Thunderbirds ee kubada kolayga, Naadiga kubada cagta Adelaide iyo Naadiga Cricket ka Dumarka ee Scorpions.

### Waa maxay guusha Loolanka Akhriska ?

Sannad kasta wax ka badan 120,000 oo ardey oo ka kala yimid 95% dugsiyada South Australia ayaa dhameeya Loolanka Akhriska Premierka. Ardey badani waxay akhriyaan wax aad uga badan 12 buug.

### Waa maxay faa'iidada ka qayb qaadashada Loolanka Akhriska Premier ka?

- Ku dhiirrigeli dhammaan ardeydu inay akhriyaan buuggag badan oo ay ka helaan akhrinta wax badan
- Waxay siineysaa xoog saarida akhriska ardeyda
- Waxay siisaa dareen ah meel gaadhid
- Wuxuu dhiirrigeliyaa ku lug yeelashada waalidiinta akhriska carruurtooda
- Wuxuu kordhiyaa buug caareysiga maktabada
- wuxuu hagaajiyaa wax akhriska iyo qorista.